
# Mustawayaasha Badbaadada Ilmaha ee Victoria


Ku soo koobida luqad waadax ah

**1**





Ururkaagu waxa uu soo dhawaynayaa carruurta Aborijinolka ah. Waxaad ku taageeraysaa inay muujiyaan dhaqankooda iyo inay ku raaxaystaan xuquuqdooda. Ma ogolid cunsuriyadda.

**2**



Badbaadada carruurta waxay muhiim u tahay qof kasta oo heer kasta ah oo ka tirsan ururkaaga. Waxaad diiwaangelisaa sida aad u heli karto, uga fogaan karto, isla mar ahaantaasna aad u joojin karto khataraha xad-gudubka ama waxyeellada loo geysto carruurta.

**3**




Ururkaagu waxa uu ka taageeraa carruurta sidii ay ku aqoonsan lahaayeen xuquuqdooda si ay uga nabad galaan xadgudubka, xog-ogaal na ugu noqdaan, isla mar ahaantaasna ay ka qeybgalaan. Waxaad ka caawisaa inay si furan u hadlaan ayna qeyb ka ahaadaan marka la gaarayo go'aamo iyaga khuseeya.

**4**

Ururkaagu wuxuu u sheegaa qoysaska iyo bulshada waxa aad samayso, iyo sida aad uga ilaaliso carruurta waxyeellada iyo xadgudubka. Waxaad ka caawisaa qoysaska inay fikradooda dhiibtaan oo ay ka qayb qaataan go'aamada saameeya ilmahooda.



**5**



Ururkaagu wuxuu fahamsan yahay inay ilmuhu kala duwan yihiin oo aysan isku mid ahayn ayna leeyihiin baahiyo kala duwan. Waxaad hubisaa inay heli karaan macluumaadka iyo caawinta ay u baahan yihiin.

**6**

Shaqaaluhu waa ay yaqaanaan waxa loo baahan yahay inay sameeyaan si ay carruurta uga badbaadiyaan xadgudubka iyo waxyeelada. Waxay diiwaangeliyaan, soo sheegaan, isla mar ahaantaasna ay wadaagaan macluumaadka ku saabsan badbaadada carruurta marka looga baahan yahay inay sidaas sameeyaan. Shaqaalaha la shaqeeya carruurta ayaa lagu sameeyay baaritaanka loo baahan yahay ee taariikhdoodii hore.



**7**

Carruurta iyo qoysaskoodu way yaqaanaan sida loo dacwoodo iyo waxa dhaca marka dacwo la sameeyo. Shaqaalahaagu waxay yaqaaniin sida saxda ah ee looga falceliyo cabashooyinka.



**8**



Ururkaagu wuxuu tababaraa uuna caawiyaa shaqaalaha si ay uga badbaadiyaan carruurta xadgudubka iyo waxyeelada. Shaqaalahaagu waxay yaqaaniin calaamadaha xadgudubka iyo waxyeelada loo geysto carruurta iyo waxa loo baahan yahay in la sameeyo haddii ay dhacaan arrimo xadgudub iyo dhibaatooyin leh.


**9**

Ururkaagu wuxuu hubiyaa in caruurtu ay nabad qabaan marka ay isticmaalaan adeegyadaada, goobaha, iyo waxyaabaha la sameeyo. Tan waxaa ku jira marka carruurtu internet-ka ku jiraan.



**10**

Ururkaagu wuxuu eegaa uuna hormariyaa siyaabaha aad ku xaqiijin karto in carruurtu ay ka badbaadaan xadgudubka iyo waxyeelada.



**11**




Ururkaagu waxa uu qoray sharciyo ku saabsan sidaad uga ilaalin lahayd carruurta xadgudubka iyo waxyeelada. Way fududahay in la fahmo, dhamaan shaqaaluhuna way u hogaansamaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir Guddiga Carruurta iyo Dhallinyarada

**www.ccyp.vic.gov.au**

COMMISSION FOR CHILDREN AND YOUNG PEOPLE